



Talaalka

Foomka Ka Rabeen Caafimaadka (arrimaha diinta iyo caqiidooyinka)

Talaaladu waa guulaha ugu waawayn ee dhanka caafimaadka kagaartay dawladu mudadii lasoo dhaafay waxayna badbaadyeen dad celcelis ahaan tiradoodu dhantahay 3 milyan oo caruur sanadkasta. Waaxda Caafimaadka Dadwayanaha iyo Bii'ada waxay si xoogan utaageeraysaa talaalka maadaama uu talaalku yahay mid kamid qaababka ugu fudud ee looga hortagi karo xanuuno haddii kale sababi lahaa cuduro xun iyo xataa dhimasho Kudhawaa Dhammaan carruurta, faa'iidooyinka talaalka ee kahortaga xanuunada ayaa aad uga badan halisaha kadhasha talaalka. Diidida inaad raacdo jadwalka Gudigga Katalo Bixinta ee Colorado uqaabilsan Xarunta Xakamaynta Xanuunada iyo iyo Hawlaha Talaalka (ACIP) si aad uga qaadato nambarka, goobta iyo waqtiga cunuga lasiinaayo kuurooyinka talaalka, waxay halis galin kartaa caafimaadka cunuga aan talaalka qabin iyo carruurta kale ee ay kulmaan. Xanuunada talaalka looga hortagi karo qaarkood waxay kubadan yihiin wadamada kale carruurta aan laga talaalina waay sifudud kuqaadi karaan mid amid ah xanuunadaas markay wadamadaas usafraan ama qof kayimid lakulmaan.

Sharciga Colorado C.R.S. Sharciga § 25-4-902 ayaa kadoonaayo arday kasta oo dhigta iskuul kasta oo kuyaala gobalka Colorado in laga talaalo xanuunada laga hortagi karo sida ay dajiyeen Gudigga xeerka Caafimaadka ee Colorado 6 CCR 1009-2, ilaa in xaalad gaar ah lasoo sheego. Sharcigaan wuxuu qabanayaa ardayda dhigata iskuulada dawlada, kuwa gaarka looleeyahay iyo kuwa xanaanada, iskuulada hoose iyo sare ilaa fasalka 12aad, kuleejyada ama jaamacadaha iyo xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga kahaysta Waaxda Adeegyada Dadka ee Colorado ayna kujiraan xarumaha daryeelka carurta, xarumaha daryeelka carruurta dugsiga gaartay, iskuulada xanaanada carruurta, xarumaha maalintii carruurta lagu xanaaneeyo, kaamamka ladagan yahay, xarumaha daawaynta maalintii, guryaha daryeelka qoyska, guryaha carruurta waalidka aan dhalin lajooga iyo barnaamijyada Head Start. Kahor intaan ilmaha lagayn dugsiga xanaada carruurta, foomka talaalada qasabka ah waa in labuuxshaa markasta oo cunugu uu gaaro xiligii talaalka sida ucad jadwalka ay dajiyeen gudigga ACIP. ^{1,2} Laga bilaabo dugsiga xanaada carruurta ilaa fasalka 12aa, foomka talaalada qasabka ah waa in labuuxshaa inta lagu jiro sanadkasta o iskuulku ardayda diiwaangalinaayo/qoranaayo¹. Carruurta aan lahayn talaalka waxaa laga yaabaa inaan lasoo galin xarunta daryeelka carruurta ama dugsiga marka uu xanuunku dilaaco; xajmiga waqtiga wuu kala duwanyahay ayadoo laga fiirinaayo nooca xanuunka iyo sababaha keenay inuu xanuunku dilaaco.

Fadlan buuxi dhamaan meelaha larabo inaad buuxiso ee foomka hoose; foomamka aan buuxin lama aqbalaayo. *Dhammaan meelaha banaan waa in la buuxiyailaa in lagu sheego inay tahay ikhtiyaari.*

Nooca uu yahay sababta Talaalka loodiiday ee aan Caafimaadka la xariirin: Waxyaabaha qofku

Aaminsanyahay Diimaha

Macluumaadka ardayga:

Magaca Qoyska:	Magaca Koowaad:	Magaca Dhexe (qasab maaha):
Jinsiga: <input type="checkbox"/> Dhadig <input type="checkbox"/> Lab	Taariikhda Dhalashada:	
Wadada #:	Magaca Wadada:	Nooca Wadada (Tusaale, Ave.):
Qaybta #:	P.O. Box:	
Magaalada:	Gobolka:	Zip Code:
Ciwaanka Emailka:		Wadanka:
Nambarka Taleefanka:		<input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Taleefanka

Waalidka/Masuulka buuxinaaya foomkaan: Tig saar haduu jiro arday madax banaan ama arday kawayn 18 sano

Magaca Qoyska:	Magaca Koobaad:	Magaca Dhexe (qasab maaha):
Xariirka kaala dhexeeya: <input type="checkbox"/> Hooyo <input type="checkbox"/> Aaabe <input type="checkbox"/> Masuul		
Wadada #:	Magaca Wadada:	Nooca Wadada (Tusaale, Ave.):
Qaybta #:	P.O. Box:	
Magaalada:	Gobolka:	Zip Code:

¹ Sharciga Gudigga Caafimaadka Colorado 6 CCR 1009-2: <https://www.sos.state.co.us/CCR/GenerateRulePdf.do?ruleVersionId=7698&fileName=6%20CCR%201009-2>.

² Talaalada Ugu fiican ee laqorsheeyay Sanadka 2018 laga Bilaabo Dhalashada ilaa 6 sano Jir: www.cdc.gov/vaccines/parents/downloads/parent-ver-sch-0-6yrs.pdf.

Ayadoo laga raacaayo jadwalka dagan, talaalada qasabka ah waxaa cunugu qaadanayaa markuu jiro 2 bilood, 4 bilood, 6 bilood, 12 bilood iyo 18 bilood da' ahaan.

Last Reviewed: January 2019



Ciwaanka Emailka:	Wadanka:
Nambarka Taleefanka:	<input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Taleefanka

Macluumaadka dugsiya/xarunta Daryeelka Carruurta ee Shatiga leh:

Magaca dugsiya/Macluumaadka xarunta Daryeelka Carruurta ee Shatiga leh:		
Degmada Iskuulka:	<input type="checkbox"/> Tig saar haddii aysan suuragal ahayn	
Ciwaanka:		
Magaalada:	Gobolka:	Zip Code:
Nambarka Taleefanka:	Fasalka Ardayga:	

Macluumaadka Xanuunka Talaalka Looga Horgi karo

Macluumaadka hoos lagu qoray waxaa loogu talagalay in laxaajiyo in waalidiintu/masuuliyiintu/ardayda loosheegay halisaha ay leedahay in cunuga aan latalaalin.

<p>Gowracadata, teetanada, xiiqdheerta (DTaP, Tdap) - Carruurta aan latalaalin waxay halis sii koraysa ugu jiraan inay qaadaan xanuunada Gowracadata, teetanada/Xiiqdheerta haddii ay lakulmaan dad qaba xanuunadaas. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha Gowracadata waxaa kamid ah wadnaha oo shaqadiisa gaba, cunugoo baraalati noqda, dhibaatooyin dhanka neefsiga ah, koomo, iyo dhimasho. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunka teetanada waxaa kamid ah daamanka oo "isku dhaga", dhibaato dhanka calalinta iyo neefsiga ah, qalal, murqaha madaxa iyo qoorta oo si xanuun leh u adkaada, iyo dhimasho. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunka xiiqdheerta (qufaca jiidama) waxaa kamid ah qufac aad udaran oo dabo dheer kaasoo keeni kara matag iyo daal, hargab, qalal, dhibaato gaarta maskaxda, iyo dhimasho. Wixii macluumaad dheeri ah: http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/dtap.pdf iyo http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/tdap.pdf</p>
<p>Jeermiska hargabka nooca B (Hib) - Carruurta aan latalaalin waxay halis ba'an ugu jiraan inay qaadaan xanuunka soonoqnoqda ee Hib haday lakulman dad qabo xanuunkaas. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunkaan waxaa kamid ah fayruuska qoorgooyaha, hargab, barar daran oo kudhaca dhuunta, dhibaato dhanka maskaxda ah, dhago la'aan, jeermisyo kudhaca dhiiga, kala goysyada, lafaha, iyo wadna oo uu xuub fuulo, iyo dhimasho. Wixii macluumaad dheeri ah: http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/hib.pdf</p>
<p>Joonis/Cagaarshowga B - Carruurta aan latalaalin waxay halis ba'an ugu jiraan inay qaadaan xanuunka Cagaarshowga B haday lakulman dad qabo xanuunkaas. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunkaan waxaa kamid ah joonis, dhibaatooyin dhanka beerka ah oo joogto ah sida dhaawac gaara beerka, nabar, ama kaankarada beerka, iyo dhimasho. Wixii macluumaad dheeri ah: http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/hep-b.pdf</p>
<p>Jeermiska Booliyada (poliovirus) oo aan kacsanayn (IPV) - Carruurta aan latalaalin waxay halis ba'an ugu jiraan inay qaadaan xanuunka Booliyada haday lakulman dad qabo xanuunkaas. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunkaan waxaa kamid ah murqaha oo baraalati noqda taasoo xanibta neefsiga, qoorgoye, naafonimo joogto ah, iyo dhimasho. Wixii macluumaad dheeri ah: http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/ipv.pdf</p>
<p>Jadeecada, Qaamo qashiirka, Jadeecada Rubella (MMR) - Carruurta aan latalaalin waxay halis sii koraysa ugu jiraan inay qaadaan xanuunada Jadeecada, Qaamo qashiirka, Jadeecada Rubella haddii ay lakulmaan dad qaba xanuunadaas. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunkaan jadeecada waxaa kamid ah hargab, qalal, dhaawac dhanka maskaxda ah, iyo dhimasho. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunka Qaamo qashiirka waxaa kamid ah dhago la'aan, qoorgooye, barar xanuun badan oo fuula xiniyaha ama ugxanta gabdhaha, iyo madhalaysnimo marar aan badnayn. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunka rubella waxaa kamid ah faruurac, bararka kala goysyada, iyo qandho fudud. Haddii qof dumar ah uu kudhaco rubella ayadoo uur leh, waxaa kudhici kara ilmo dilan ama waxay dhalaysaa cunug dhibaatooyin badan oo daran qaba. Wixii macluumaad dheeri ah: http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/mmr.pdf</p>
<p>Talaalka Jeermisyada Pneumococcal (PCV13) - Carruurta aan latalaalin waxay halis ba'an ugu jiraan inay qaadaan xanuunka Pneumococcal haday lakulman dad qabo xanuunkaas. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunka waxaa kamid ah hargab, jeermisyo kudhaca sanbabada, jeermisyo kudhaca dhiiga, qoorgooye iyo dhimasho. Wixii macluumaad dheeri ah: http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/pcv13.pdf.</p>
<p>Varicella (Busbuska) - Carruurta aan latalaalin waxay halis ba'an ugu jiraan inay qaadaan xanuunka Varicella haday lakulman dad qabo xanuunkaas. Astaamaha halista ah iyo dhibaatooyinka kadhaha xanuunka Varicella waxaa kamid ah jeermis daran oo kudhaca maqaarka, hargab, dhaawac dhanka maskaxda ah, iyo dhimasho. Wixii macluumaad dheeri ah: http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/varicella.pdf</p>

Talaalada laga rabo Ardayda Galaysa Iskuulka - Juqor "X" talaal asta oo aad diidayso.

	gowracadata, teetanada iyo xiiqdheerta (DTaP)	Jeermiska poliovirus oo aan kacsanayn (IPV)
	gowracadata, teetanada iyo xiiqdheerta (Tdap)	Jadeecada, fqaamo qanshiirka, jadeecada rubella (MMR)

Jeermiska hargabka nooca B (Hib)	Talaalka Jeermisyada Pneumococcal (PCV13)
Cagaarshowga B	Varicella (busbus)

Qoraalka Diidmada ah

Waxaan ahay waalidka/masuulka ardayga kor lagu sheegay magaciisa ama waxaan ahay ardayga laftiisa (arday xor ah ama 18 sano kawayn) waxaana diidayaa talaalka kor kuxusan sababo laxariira arimo laxariira caqiido ama diimeed kuwaasoo aan ogolayn talaalka. Macluumaadka aan kusheegay foomkaan waa mid dhamays tiran oo sax ah.

- Waan badali kara fikirkaayga waana aqbbali karaa talaalka markaan rabo cunugayga ama naftayda mustaqbalka danbe.
- Waxaan kafiirin karaa macluumaadka talaalka cadaymaha leh bogga www.colorado.gov/cdphe/immunization-education, or www.ImmunizeforGood.com si aan u ogaado macluumaad dheeri ah oo kusaabsan faa'iidooyinka iyo halisaha talaalka iyo xanuunada ay kahortagaan.
- Waxaan la xariiri karaa Nidaamka Macluumaadka Talaalka ee Colorado (CIIS) anoo galaaya www.ColoradollS.com ama laxariiraaya daryeelahayga dhanka caafimaadka si aan uhelo diiwaanka talaakayga ama kan cunugayga.³

Waxen xaqiijinayaa inaan akhriyay dukumiintigaan dhamaantiis.

Saxiixa Waalidka/Masuulka/Ardayga (xorta ah ama kawayn 18 sano): _____ Taariikhda: _____

(Qasab maaha) Waxaan ufasaxayaa in iskuulkayga ama kan cunugayga uu faafiyo diiwaanada talaalkayga/cunugayga uuna tuso wakaaladaha maxaliga/gobalka ee caafimaadka dadwaynaha iyo Nidaamka Macluumaadka Talaalka ee Colorado, Xarunta amaanka, macluumaadka talaalka ee qarsoodiga ah ee gobalka.

Saxiixa Waalidka/Masuulka/Ardayga (xorta ah ama kawayn 18 sano): _____ Taariikhda: _____

³ Ayadoo laraacaayo sharciga Colorado, waxaad xaq uleedahay inaad kasaarto macluumaadka ardaygaaga CIIS xili kasta. Si aad go'aan uga qaadato CIIS, waxaad gali kartaa www.colorado.gov/cdphe/ciis-opt-out-procedures. Fadlan waxaa lagugu wargalinayaa in aad adigu masuul katahay ilaalinta diiwaanka talaalka cunugaaga si aad uxaqiijiiso in dugsiga shuruucdiisa laraaco.